

*90<sup>th</sup> Day Letter-Not Compliant (Behind Schedule or No Record)*

Taariikhda:

Gacaliye Waalid:

Marka la eego diiwaanadayada, sannad dugsiyeedkan ilmahaagu ma ahayn mid raacay Sharciga Tallaalka Ardayga Wisconsin (Wisconsin Student Immunization Law). Tani waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu aanu lahayn caddaymaha tallaalka habboon iyo ka dhaafista tallaalka oo uu feelka ugu jiro.

Tallaaladu waa mid kamid ah hababka ugu muhiimsan ee looga ilaaliyo carruurteena cudurrada iyo cawaaqibyada ka iman kara cudurradan. Tallaalku si gaar wuxuu muhiim ugu yahay carruurta da'da dugsi gaaray sababtoo ah carruurta dugsi dhigtaa waxay si joogto ah ugu dhaw yihiin dad kale kuwaasi oo ay dhici karto in laga ilaaliyey ama aan laga ilaalin cudurradan.

Bilaha soo socda, waxa aanu ugu boorinaynaa inaad ballan ka qabsato bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga si ilmahaaga loo tallaalo. Ku boori bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga inuu isticmaalo Diiwaanka Tallaalka Wisconsin (Wisconsin Immunization Registry) iyo wixii diiwaano tallaalka ah ee aad ka hayso ilmahaaga si uu u go'aamiyo tallaalkada ilmahaagu u baahan yahay. Haddii ilmahaagu aanu lahayn bixiyaha daryeelka caafimaad, fadlan la xidhiidh waaxda caafimaadka deegaankaaga si aad u go'aamiso haddii ilmahaagu mutaystay inuu helo tallaalka waaxda caafimaadka. Macluumaadka la-xidhiidhka waaxda caafimaadka deegaanka waxaa laga heli karaa bogga internetka: <https://www.dhs.wisconsin.gov/lh-depts/counties.htm>

Fadlan ogow in dayrta sannad dugsiyeedka dambe, diiwaanada tallaalka ilmahaaga dib loo qiimayn doono si loo hubiyo inuu qaatay tallaalka la rabo heerkiisa/eeda fasalka ama ka dhaafista feelka ugu jiro. Haddii caddaymo ku filan aan laga dhiibin ilmahaaga, waxa dhici karta in loo baahdo inuu guriga joogo oonu dugsi iman.

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan tallaalka, fadlan booq bogga internetka: <http://www.cdc.gov/vaccines/vac-gen/default.htm>

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay ka badbaadinta dhammaan carruurta dugsiyada Wisconsin cudurrada lagaga hortagi karo tallaalka.